FASAXA MUSHAARKA LEH





Laga bilaabo 1-da Janaayo, sannadka 2026, shaqaalaha Minnesota waxay heli doonaan fasax mushahar leh oo qoys iyo caafimaad ah. Fasaxa Mushaharka leh wuxuu kuu oggolaanayaa inaad shaqada ka nasato adigoo weli helaya qayb ka mid ah mushaharkaaga. Waxa kale oo uu ilaalinayaa shaqadaada, si aadan ugu qasbanaan inaad kala doorato shaqadaada, caafimaadkaaga, ama qoyskaaga.

## WAA MAXAY FASAXA MUSHAARKA LEH?

Fasaxa Mushaarlaha waxaad isticmaali kartaa markaad u baahan tahay inaad shaqada ka aqnaato muddo cayiman.

- Fasaxa Caafimaadka si add:
  - U maareyso xaalad caafimaad oo halis ah ee adiga kugu timaadda
- Fasaxa Qoyska – si aad:
  - u soo dhaweyso ilmo (dhalasho, adabti, ama korsasho ku-meel-gaar ah)
  - U daryeesho xubin qoyskaaga ka tirsan oo qaba xaalad caafimaad oo halis ah
  - U taageerto xubin qoyskaaga ka tirsan oo adeeg ciidan ku jira
  - Uga jawaabto walaacyo badbaado sida rabshadaha guriga dhexdiisa ka dhaca ama daba-galka

Fasaxa Mushaarlaha wuxuu kugu taageerayaa baahidaada mid qorsheysan ama mid lama filaan ah. Waxaad u adeegsan kartaa inaad daryeesho qof kasta oo kugu dhow oo kugu tiirsan sidii qoyskaaga.

## SIDEE AYAY U SHAQAYSAA

- Waxaad codsiga ku gudbin kartaa internetka ama telefoon.
- Haddii codsigaaga la ansixiyo, waxaad helaysaa lacag bil ahaan ah inta aad fasaxa ku jirto.
- Waxaad fasaxa u isticmaali kartaa hal mar oo dhan ama qaybo yaryar oo kala go’an.

## IMISA FASAX AAD QAADAN KARTAA?

Sannad gudahiisa, waxaad qaadan kartaa:

- Ilaa 12 usbuuc oo Fasaxa Caafimaad ah
- Ilaa 12 usbuuc oo Fasaxa Qoyska ah

Haddii aad u qalanto labada Fasax, waxaad qaadan kartaa guud ahaan ilaa 20 usbuuc.

## IMISA AYAA LAGUU SIIN DOONAA?

Markaad isticmaasho Fasaxa Mushaharka leh, dowladdu waxay ku siinaysaa qayb ka mid ah mushaharkaaga caadiga ah. Shaqaale ahaan celcelis, waxaad heli doontaa 77% mushaharkaaga caadiga ah inta aad fasaxa ku jirto, iyadoo lacagta ugu badan ee usbuucle ah ee la bixinayo sannadka 2026 ay tahay $1,423.

## DHOWRISTA SHAQADA FASAXA MUSHAARKA LEH

- Guud ahaan, waa in inaad ku soo noqotaa shaqadaadii ama shaqo la mid ah, marka aad fasaxa ka soo laabato.
- Shaqo dhowrka waxay bilaabataa 90 maalmood ka dib marka shaqada siiyay.
- Iyadoo aan loo eegin muddada aad shaqada ku jirtay, loo-shaqeeyuhu ma aargoosan karo haddii aad codsato ama isticmaasho Fasaxa Mushaharka leh.

*Haddii aad qabtid su'aalo ama aad u baahan tahay caawimaad, fadlan la xiriir Xarunta Xogta Fasaxa Mushaarka leh: 651-556-7777 ama 844-556-0444 (wac bilaash ah). Macluumaad kale ayaa lagu heli karaa qaabab kale oo loogu talagalay dadka naafada ah ama dadka u baahan caawimaad turjumid, adigoo adeegsanaya lambarrada kore.*

info.paidleave.mn.gov

WAX BADAN KA BARO

MINNESOTA PAID LEAVE

Minnesota Department of Employment and Economic Development
180 E 5th St Suite 1200 | Saint Paul, MN 55101

8/2025 Somali